JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند


| | | |
|---|---|---|
| *Sananadka 10aad* | *Cadad Gaar ah* | *06/02/2021* |


# WAX-KA-BEDDELKA IYO KAABISTA XEERKA LA'DAGAALANKA MAAN-DOORIYAHA, XEER LR.21/2021


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2021*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-623/012021 Taar: 18/01/2021

## Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka La'dagaalanka Maan-dooriyaha, Xeer Lr. 21/2021**

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobada 75aad ee Datuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada Go'aan Lr.GW/KF-44/876/2021, eek u taariikheysan 04/01/2021, ee ay ku ansixiyeen Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka La'dagaalanka Maan-dooriyaha, xeer Lr. 21/2021;

Waxaan soo-saaray;

Dhaqan-galka Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka La'dagaalanka Maan-dooriyaha, xeer Lr. 21/2021.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**The Republic of Somaliland**
**House of Representatives**
Head Quarter Hargeisa.

**Jamhuuriyadda Somaliland**
**Golaha wakiilada**
Xarunta Hargeisa

Ref: GW/G/KF-44/876/2021
Date: 04/01/2021

**Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka La-dagaallanka Maan-doriyaha Xeer Lr. 21/2021**

GOLAHA WAKIILADU

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay**:- | Qodobbada 5aad, 16aad(4)aad iyo 128aad(1)aad ee Dastuurka oo ku saabsan in Shareecada Islaamku saldhig u tahay Xeerarka & Shuruucda JSL lagaga dhaqmayo, wixii ka soo horjeedaana yahay waxba kama jiraan. |
| **Markuu Arkay**:- | In maan-dooriyuhu halis wayn ku yahay amniga dalka, sidoo kalana saamayn taban ku leeyahay koboca dhaqaalaha, akhlaaqiyaadka iyo dhaqanka suuban ee bulshada. |
| **Markuu Aqoonsaday**:- | In maan-dooriyuhu si baaxad leh u soo galo dalka sidoo kalana isticmaalkiisu uu aad ugu sii fidayo qaybaha bulshada gaar ahaan da'yarta, kaasi oo keeni kara dhibaatooyin isugu jira amniga, dhaqaalaha iyo akhlaaqda bulshadaba. |
| **Markay U Caddaatay** | In xeerka hadda jira aanu dhigayn ciqaab ku filan in lagu xakameeyo soo galinta iyo ka ganacsiga maan-dooriyaha, sidaa daraaddeed loo baahan yahay in ciqaab culus oo ku filan la saaro dadka ku kaca soo galinta, isticmaalka iyo ka ganacasiga maan-dooriyaha. |
| **Markuu Arkay**:- | Soo jeedinta Xukuumadda ee Wax ka badal iyo Kaabis in lagu sameeyo Xeerkii la-dagaallanka Mukhadaraadka Xeer **Lr. 21/2001** |
| **Markuu u codeeyay:-** | Ansixinta Xeerka Hay'adda Caymiska **Kal-fadhiga 44aad ee Fadhigiisi 24aad** taariikhduna ahayd **4/01/2021** oo ay goob joog ahaayeen **(43)** Mudane oo ka mida mudanayaasha Golaha Wakiilada. |

# WUXUU

Cod aqlabiyad ah **38 cod** oo gacan taag ah ku Ansixiyay **wax-ka-badelka iyo kaabista Xeerka la-dagaalanka maandooriyaha (Xeer Lr. 91/2021)**, halka diiday aanay jirin, **afar (4)** mudane-na ka aamuseen **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**

**Baashe Maxamed Faarax**
**Guddoomiyaha GolahaWakiilada**

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADA SOMALILAND

**Markuu Arkay**: - Qodobbada 5$^{aad}$, 16$^{aad}$(4)$^{aad}$ iyo 128$^{aad}$(1)$^{aad}$ ee Dastuurka oo ku saabsan in Shareecada Islaamku saldhig u tahay Xeerarka & Shuruucda JSL lagaga dhaqmayo, wixii ka soo horjeedaana yahay waxba kama jiraan.

**Markuu Arkay**: - In maan-dooriyuhu halis wayn ku yahay amniga dalka, sidoo kalana saamayn taban ku leeyahay koboca dhaqaalaha, akhlaaqiyaadka iyo dhaqanka suuban ee bulshada.

**Markuu Aqoonsaday**: - In maan-dooriyuhu si baaxad leh u soo galo dalka sidoo kalana isticmaalkiisu uu aad ugu sii fidayo qaybaha bulshada gaar ahaan da'yarta, kaasi oo keeni kara dhibaatooyin isugu jira amniga, dhaqaalaha iyo akhlaaqda bulshadaba.

**Markay U Caddaatay** In xeerka hadda jira aanu dhigayn ciqaab ku filan in lagu xakameeyo soo galinta iyo ka ganacsiga maan-dooriyaha, sidaa daraaddeed loo baahan

yahay in ciqaab culus oo ku filan la saaro dadka ku kaca soo galinta, isticmaalka iyo ka ganacasiga maan-dooriyaha.

**Markuu Arkay**: - Soo jeedinta Xukuumadda ee Wax ka badal iyo Kaabis in lagu sameeyo Xeerkii la-dagaallanka Mukhadaraadka Xeer Lr. 21/2001

# Wuxuu Ansixiyay

Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka La-dagaallanka Maan-doriyaha Xeer Lr. 21/2020

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QODOBKA 1AAD
## MAGACA XEERKA

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa **Xeerka La-dagaallanka Maan-dooriyaha (Xeer Lr. 21/2020)**

## QODOBKA 2AAD
## EREY-BIXINTA

**Maan-dooriye-** Waxaa loola jeedaa shay kasta oo isticmaalkiisu bedelo xiska aadamaha oo keeni kara sakhrad muddo dheer ama muddo gaaban sifa kasta ha lahaadee.

**Caadayste: -** Waxaa loola jeedaa Qof kasta oo qabatimay isticmaalka maan-dooriye ee xeerkan lagu mamnuucay isticmaalkiisa iyo Ganacsigiisa ee ay Maxkamad horteed kaga cadaato hal mar iyo wax ka badan

**Isticmaal Maan-dooriye: -** Waxaa loola jeedaa sifa kasta oo loo qaato maandooriye sida cabbid, qiijin, ursasho, turqin irbad, isku mudis, shidasho ama cunid, Nuugis, jiqis, buufin, iyo qaab kasta oo loo isticmaalo Maandooriye.

**Gaadiid:**- Waxaa loola jeedaa wax kasta oo qaada Maandooriye sida gawaadhiga, diyaarada iyo Markab ama doon, Awr, Demeero, Fardo, iyo wax kasta

oo lagu qaado maan-dooriye

**Maxakamadda:** - Waxaa loola jeedaa Maxakamadda awooda u leh ka gaadhista go’aan fal-danbiyeey dhacay oo uu jideeyay Xeerkani.

**Jeedalid: -** Waxa loola Jeedaa karbaash ciqaab ah oo shareecadda Islaamku banaysay.

**Jeedal: -** Waxa loola jeeda shayga ama aallada loo adeegsanayo karbaashka xadka shareecada Islaamku banaysay.

## QODOBKA 3AAD
## CIQAABTA KA DHALANAYSA ISTICMAALKA MAAN-DOORIYE

1) Qofkii isticmaala maandooriye ee ay maxkamad horteed kaga caddaato waxa lagu ciqaabayaa karbaash dhan afartan (40) jeedal iyo ciqaab xadhig ah oo dhan **2 sano** ilaa **3 sanadood** oo xadhig aan iib lahayn ah.

2) Qofkasta oo ku isticmaala maan-dooriye meel fagaare ah, dadweynaha u furan, sakhrad ku muuja meel fagaare ah ama dadweynaha u furan oo ay maxakamad horteed kaga caddaato waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan iyo ganaax dhan **5,000,000 Sl. Shillin ilaa 10,000,000** Sl. Shillin oo hadduu bixin waayo loogu bedelayo xadhig u dhigma.

3) Qofku haddii uu yahay mid caadaystay isticmaalidda maan-dooriyaha waxa lagu ciqaabayaa karbaash dhan afartan (40) jeedal ama/iyo ciqaab xadhig ah oo dhan **3 sano ilaa 5 sanadood** oo xadhig aan iib lahayn.

4) Caadayste waxa loo aqoonsanayaa qof kasta oo ay maxkamad horteed kaga caddaatey isticmaal maan-dooriye laba jeer ugu yaraan iyo wixii ka badan.

5) Qofkasta oo siiya maan-dooriye qof da'diisu ka yar tahay 15 sano ama qof xiskiisu dhiman yahay oo ay maxkamad horteed kaga caddaato waxa lagu ciqaabayaa xadhig dhan **5 sanno ilaa 8 sannadood** oo aan iib lahayn.

6) Qofkasta oo u qariya qof kale shay maan-dooriye ah ama cunto ugu dara oo ay maxakamad horteed kaga caddaato waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan faqradda 4aad ee qodobkan.

7) Qofkasta oo ku khasba qof kale shay maan-dooriye ah oo ay maxakamad horteed kaga caddaato waxa lagu ciqaabayaa xadhig dhan **7 sanno ilaa 10 sannadood** oo aan iib lahayn.

8) Qofka daawo ahaan dakhtar la aqoonsan yahay u siiyo ama ugu mudo shay maan-dooriye xeerkani u aqoonsaday ciqaabaha Qodobkan laguma

xukumayo marka la cadeeyo in dakhtar la aqoonsanyahay dawo ahaan u siiyay.

## QODOBKA $4^{AAD}$
## CIQAABTA KA GANACSIGA, SAMAYNTA, HAYSASHADA, BEERISTA SOO GALINTA MAAN-DOORIYE

1) Qofkasta oo dalka soo galiya, beera, sameeya, ka ganacsada ama si uun u haysta maan-dooriye uu ka ganacsanayo oo ay maxakamad horteed kaga caddaato waxa lagu ciqaabayaa xadhig dhan **5 Sanno ilaa 15 sannadood** oo aan iib lahayn.

2) Maxkamaddu waxay amraysaa in la baabiiiyo ama la gubo dhamaan maan-dooriyihii la qabtay, kii la beeray, qalabkii lagu beeray ama lagu sameeyay.

3) Wadaha gaadiidka dalka soo galiya maan-dooriye nooc kasta oo uu yahay (mid dhul, cir iyo bad) ee ay Maxkamad horteed kaga caddaato waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusand faqradda $1^{aad}$ ee Qodobkan.

4) Gaadiidka lagu qabtay maan-dooriye ee ay Maxkamad horteed kaga caaddaatay waxa marka koowaad lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan **20% Qiimaha gaadiidka**, Marka labaad waxa la ganaaxayaa **50% qiimaha gaadiidka** marka saddexaad waa lala wareegayaa.

5) Qofka Mas'uulka ah degan guriga (dhismaha) lagu iibiyo maan-dooriye ee ay maxkamad horteed kaga caddaato waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan faqradda 1aad ee Qodobkan iyadoo digniin

qoraal ahna la siinayo marka koowaad mulkiilaha guriga, marka labaad ee lagu helo waxa mulkiilaha guriga lagu ganaaxayaa **2% qiimaha guriga,** marka saddexaad ee lagu helo waxa lagu ganaaxayaa **5% qiimaha guriga,** marka afraad ee lagu helo waa lagala wareegayaa dhismaha.

6) Qofkasta oo kale oo degan guriga oo ka qayb qaata qarinta, qaybinta iyo Iibinta maan-dooriyaha waxa lagu ciqaabayaa 3 ilaa 5 Sanno.

## QODOBKA 5AAD
## GACANSIINTA IYO KA QAYB QAADASHADA SOO GALINTA MAAN-DOORIYE

Qofkasta oo ka gacansiiya, jidmariya, qariya ama si uun uga qayb qaata soo galinta maan-dooriye oo ay maxkamad horteed kaga caddaato waxa uu mutaysanayaa ciqaab xadhig ah oo dhan (5-10 sannadood) oo aan iib lahayn.

## QODOBKA 6AAD
## BEDELAAD IYO LAALID

Xeerkani wuxuu bedelayaa qodobbada 411, 412, 413, 414, 415, 416, 417, 342 iyo 343 ee Xeerka Ciqaabta Guud, waxa kale oo uu laalayaa Xeerkani, Xeer kasta oo ka soo horjeeda.

## QODOBKA 7AAD
## DHAQAN-GALKA

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa Marka Labada Gole ee Baarlamaanka (Golaha Guurtida iyo Golaha Wakiilladu) Ansixiyaan, Madaxweynaha

Jamhuuriyadda Somalilandna saxeexo, faafinta rasmiga ahna lagu soo saaro.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL**

---

**Baashe Maxamed Faarax**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL**

---